

Qoraal kooban

05/2020

2020-ka Doorasho Qof iyo Cod ah Haddii La Waayo:

Halla Qaato 'Doorashada Ka-Qeybgalka Ballaaran'

Hordhac

Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ayaa 21-kii Febraayo 2020 saxiixay shircigii muddada dheer la sugayay ee doorashooyinka, kaas oo sannado laga soo shaqeynayay. Madaxda Dowladda Federaalka ee Soomaliya (DFS) waxa ay tallaabidan u arkeen mid taariikhii ah, maxaa yeelay sharcigu wuxuu, mabda'a ahaan, muwaadiniinta siinayaa fursadda ah inay toos u doortaan wakiilladooda, markii ugu horreysay tan iyo 1969-kii.¹ Sidoo kale, sharciga waxaa loo asteyay in lagu dhaqan galiyo doorashooyinka baarlamaanka ee dabayaqaada sannadkan, iyo doorashada madaxweynaha ee horraanta sannadka soo socda. Si kastaba ha ahaatee, waxaa iska cad in hirgalinta sharcigan doorashada soo socota, ay tahay mid aan sahlaneyn.²

Marka laga sootago inuusan sharcigan ku qotomin heshiis siyaasadeed oo ka dhaxeeya saamileyda siyaasadda³, wuxuu leeyahay lakabyo kale oo badan. Waxaa kamid ah asteynta deegaan doorashada kursi walba, mataaladda Somaliland iyo Banadir, hubinta qoondada haweenka iyo caddaynta kaalinta xisbiyada siyaasadda.

Wakhtiga kooban ee ka haray xilheynta Madaxweyne Farmaajana kuma filna in laga heshiisyo dhammaan qodobbadaas. Amni xumadu, iyana, wali waa ay baahsan tahay, dhaqaalahaa loo baahan yahayna ma ahan mid ay u babac dhigi karaan DFS iyo dowlad-goboleeyada.⁴

Intaas waxaa dheer in tiknoolajiyada loo baahan yahay si ay u dhacdo doorasho qof iyo cod ah aysan oollin Soomaaliya. Sharcigan cusub, oo isku barxaya nidaamka casriga ah ee dimoqraadiyadda iyo dhaqanka Soomalida ee awood qaybsiga beelaha, wuxuu farayaa in la isticmaalo nidaamka hubinta cod-bixiyaha ee biometric loo yaqaanno. Aad bay u adag tahay, haddaaneyba mustaxiil aheyn, in Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ) uu soo raadsado kharashka loo baahan yahay, iibsado qalabkii loo baahnaa, kaddibna qaato tababarkii loo baahnaa, muddada 8-da bilood ah ee hartay gudaheed.

Marka la eego muddada gaaban ee hartay, waxaa la gudboon saamileyda siyaasadda inay gaaraan xal loo dhan yahay oo la xiriira doorashada. Haddii taa la waayo, natijjada aan loogu tala gelin – amaba laga yaabo in loogu tala galay, waxa ay noqoneysaa muddo kororsi maamulka hadda jira.

1 (Madaxweynaha Soomaaliya ayaa Sharcigii Doorashooyinka ee Taariikhiga Ahaa Saxiixay) Somali President Signs Historic Election Bill Into Law; <https://bit.ly/3flu6Et>

2 Guddiga Doorashooyinka ee Madaxa Bannaan (NIEC) 27 May 2020 ayay Baarlamaanka hortagayaan oo u sheegayaan haddii ay doorasho ku qaban karaan waqtigeeda;

3 Daraasaddayadii hore ee doorashooyinka (Soomaaliya: Baadigoodbka Hannaanka Doorasho ee ugu Habboon 2020-ka; <https://bit.ly/2LCuEOh>), saamileyda siyaasadda waxa aan ku qeexnay Dowladda Federaalka, Dowladaha Gobolada iyo Xisbiyada diiwaan gashan.

4 Miisaaniyaddii ugu danbeysey Dowladda Federaalku dhaqaale uma qoondayn doorashooyinka, dowladaha goboladuna sidoo kale ma qoondayn miisaaniyad.

Sida aan ku sheegnay warbixintii aan kal hore soo saarnay, muddo korosi wuxuu dib u celinayaah horumarkii laga gaaray dhinacyada nabad-dhiska iyo dowlad-dhiska, tan iyo markii dib la soo yagleelay Jamhuuriyadda Saddexaad sannadkii 2000, waxaa kale oo taasi ay horseedi kartaa in DFS ay weydo sharciyaddii ay ku taagneyd, ama rabshado siyaasadeed dhacaan amaba dalku uu sii kala irdhoobo.⁵

Sababahaas dartood, sida maangalka ah ee habboon waxa weeye in saamileyda siyasadda iyo bawhadaagta caalamku xoogga saaraan heshiis siyaasadeed oo dhixmara dhinacyada ay doorashadu khuseyso, iyo in la helo hannaan doorasho oo awoodda siinaya muwaadinka. Cilmi baaristeenna iyo gorfeyntennu waxa ay muujinayaan in doorasho qof iyo cod ah oo haysata taageerada shacabka, isla markaana leh astaamaha biyo kama dhibcaanka ah ee doorasho xor iyo xalaal, in aysan suurtagal ahayn xilli doorasheedkan.

Istiraatijiyadda kaliya ee shaqyan karta 8-da bilood ee ka harsan xilheyni Madaxweyne Farmaajo waa in la helo hannaanka labaad ee ugu wanaagsan, marka qof iyo cod laga soo tago. Waana inuu noqdaa mid ballaariya ka qaybgalka muwaadinka iyadoo isla markaana la hubinayo hufnaanta nidaamka. Sidoo kale, waa in doorasho ka dhacdaa ugu yaraan saddex magaalo oo ka tirsan dowlad-goboleed walba. Ha yeeshi, hannaan walba oo lagu heshiyo waa inuu yeeshaa laba sifo:kow, waa inuu u gogol xaaro doorasho qof iyo cod ah, waana inuu noqdaa mid ay ku heshiyeen dhammaan saamileyda siyaasadda.

Warbixitan waxa ay qiimayn saaraysaa isla markaana gorfeyneysaa sharciga doorashada, daldaloollada uu leeyahay iyo caqabadaha ku heersan. Sidoo kale, warbixintani waxa ay soo bandhigaysaa hannaan doorasho oo qayb ahaan ku qotoma sharciga doorashada isla markaana sahli kara in saamileydu ku heshiyaan isla markaana shacab badan ay wax doortaan.

Sooyaalka sharciga doorashada

Bilo kaddib markii ay xukunka la wareegtay, DFS bilowgii 2017 waxa ay sameysay guddi khubaro ah oo soo qiimeeya noocyada doorashooyinka. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa iyana guddi farsamo sameysay, iyadoo la tashatay khubaro kaddibna xulatay nidaamka Liiska Xiran ee Mataaladda Isku Dheelli-Tiran oo marka lasoo gaabiyo loo yaqaanno (Closed List Proportional Representation). Iyada oo halkaas ka amba qaadeysa ayay wasaaraddu qortay sharcigan.⁶ Markii horeba, DFS way ka gaabisay la tashiga saamileyda siyaasadda. Wadatashigii ugu horreeyay ee siyaasadeedna waxa ay billowday 16 billood kaddib markii ay xukunka la wareegtay. Bishii June 2018 ayay hoggaamiyayaasha DFS, kuwa dowlad-goboleedyada iyo guddoomiyaha gobolka Benadir ku kulmeen Baydhabo, waxa ayna ku dhawaaqueen in ay ku heshiyeen nidaamka CL-PR iyo inuu dalku hal degmo doorasho noqdo.⁷

Nasiib darro, heshiiskaas waxa uu burburay kahor intii aysan qallalin qalinkii lagu qoray. Madaxda dowlad-goboleedyada ayaa ku kulmay Kismaayo September 2018 waxa ayna sheegeen in ay aqbaleen nidaamka CL-PR, balse waxa ay ku baaqeen in la badiyo degmo-doorashooyinka dalka.⁸ Arrintani ma aheyn mid ugub ah maaddaama ay Soomaaliya hore u isticmaashay degmooyin badan oo doorasheed iyo nidaamka Liiska Xiran ee Mataaladda Isku Dheelli-Tiran (CL-PR). Barlaamaankii 123-da xubnood ka koobnaa ee lixdameeyadii waxaa laga soo doortay 42 degmo doorasho.⁹ Iyada oo halkaas xaalku marayo ayay DFS waxa ay Golaha Wasiirrada ka ansixisay sharci kale oo aysan cidna kala tashan.¹⁰ Sharcigan cusub waxaa ku jiray qodobbo lala yaabay, oo ay kamid ahaayeen in madaxweynuhu uu kasoo dhex bixi doono xisbiga ama isbaheysiga ku guuleysta inta badan kuraasta baarlamaanka.

5 Laga soo billaabo 2000, doorashooyinku waxa ay dhici jireen xilligii loogu talagalay. Waxaa lagama maarmaan noqotay, lagana gorgortami karin, wareejinta xilka markii lagaaro dhammaadka mudda xileedka madaxwaynaha talada haya. Madaxwanye Farmaajo iyo dawladdisa waxaa lagu aaminay lagana filayay in ay dalka gaarsiyyaan doorashooyin hal-qof iyo hal-cod ah. Loogamase fadhiyo in ay muddo korarsi sharci darra ah la soo shirtagaan.

6 Waysi lala yeeshay masuul ka mida dawladda, Nairobi. Sibteembar 2019.

7 Guddiga amniga qaranka oo kulan ku yeeshay maagalada Baydhabo 5 June 2018, soona saaray warmurtiyeed ay ku sheegeen inay ka heshiyiien habraaca doorashada. Halkan ka daalaco <https://villasomalia.gov.so/soomaali/war-murtiyeedka-golaha-amniga-qaranka/>

8 Fiiri: <https://www.caasimada.net/akhriso-war-murtiyeedka-shirka-kismaayo-maamul-gobleedyada-oo-xiriirka-u-jaray-dowladda-dhexe/>

9 Baarlamaanka qaranka oo isku sidkay laba sharci-doorashooyin oo kala duwan sannadkii 1964. fiiri axdiga 4 aad (Jan 1964). Maarten Halfvayaay sharciyada doorashooyinka halkan ku kaydisay.

10 Fiiri <https://www.radiodalsan.com/akhriso-xeerka-kheyre-u-gudbiyay-baarlamaanka-ee-xulida-guddiga-agaasinka-bangiga-dhexe/>

Qodobkani wuxuu si toos ah uga hor-imaanayay Dastuurka KMG iyo sooyaalkii dalka u degsanaa tan iyo 1960-kii, kaas oo ahaa in madaxweynaha mar walba ay toos u doortaan xubnaha baarlamaanka.¹¹ Inkasta oo aad looga horyimid sharcigan maaddaamaa uu hareer maray Dastuurka KMG, haddana DFS waxa ay hordhigtagtay baarlamaanka si uu u ansixiyo.¹²

Tallaabadii waxa ay keentay ismariwaa waxa ayna sumeysay jewiga siyaasadda dalka. Kadibna Afhayeenkha Golaha Shacabka, Maxamed Mursal, ayaa magacaabay guddi 15 mudane ka kooban oo kasoo baaraandaga sharcigan.¹³ Guddiga ayaa durbadiiba gaashaanka u daruuray hindisahan, iyaga oo markiiba soo celiyey xaqii dastuuriga ahaa ee baarlamaanku u lahaa doorashada madaxweynaha.¹⁴ Weliba, guddigu waxa uu sharciga kusoo daray nidaamka awood qeybsiga qabiilka ee 4.5, iyaga oo ku dooday inuu saldhig u yahay bulshada Soomaaliyeed. Wawaase intaas ka muhiimsan in guddigu uu beddelay nidaamkii Liiska Xiran ee Mataaladda Isku Dheelli-Tiran, isagoo soo jeediyeen nidaamka Qofkii Hormaraa Guuleystay ee marka lasoo gaabiyo loo yaqaanno (First-Past-Post / FPP), iyagoo dalkana u qaybiyey 275 deegaan doorasho, tiradaas oo lamid ah mid ah kuraasta Golaha Shacabka.

Sidoo kale, guddigu wuxuu hoosta ka xarriiqay in doorasho qof iyo cod ah aysan suurtagal aheyn xilligan, iyagoo soo bandhigay cillado badan, sida: dibu eegista Dastuurka KMG, meel-marinta sharciga jinsiyadaha, dhammeystirka tirakoobka iyo xadeynta soohdimaha dowlad-goboleedyada.¹⁵ Tallaabadii waxa ay dharbaaxo weyn ku aheyd Madaxweyne Farmaajo oo doonayay in muwaadiniintu toos u doortaan, isaga oo ka meer-meerayey caqabadaha waaweyn ee doorashada ku mataansan.

Golaha Shacabka ayaa aqbalay hindisayaasha guddiga iyo talooyinkooda, waxa ayna qalinka ku duugeen sharcii cusub oo ay meel-mariyeen 28-kii Disembar 2018. Aqalka Sare ayaa isna ansixiyeen sharcigaas, madaxweynuhuna waxa uuu saxiixay Febraayo 2020. **Waxaa cajiib ah in Golaha Wasiirrada (oo 70% xildhibaanno ah), ay labada sharcii ee isburinaya u codeeyeen.**

Gorfeynnta Sharciga Doorashada

Yoolka sharciga doorashada oo ka kooban 58 qodob waa in dalka ay ka qabsoonto doorasho xor ah, xaalaal ah, lagu kalsoon yahay, sharcii ah, madax bannaan, qof iyo cod ah, oo ka dhacda heerka federaalka. Wuxuu hoosta ka xarriiqayaa in muwaadin walba la dooran karo, ciddii uu doonana uu dooran karo, bilaa takoor.¹⁶ Sidaas oo ay tahay, sharcigu wuxuu tibaaxayaa inuu xoojin doono hannaanka awood qeybsiga beelaha, si waafaqsan Dastuurka KMG, qodobbadiisa 64 (3) iyo 72 (c).¹⁷ Labadaas mabda'a ayaa iska horimaanaya. Sharcigu wuxuu leeyahay "inta laga dhammeynayo tirakoobka dalka oo dhan kaas oo asteyn doona qoondada deegaannada ee kuraasta, doorashadu waxa ay ka dhacaysaa goobtii suurtagal ah, si ku dhisan awood qeybsiga Soomaalida."¹⁸ Qodobkan wuxuu markii ugu horreysay sharciyeynayaa hannaanka 4.5, wawaana laga yaabo inay khatar weyn ku noqota mustaqbalka doorashooyinka dalka.

Khobarada kala ah Bernard Grofman iyo Arend Lijphart waxay qabaan in sharcii doorasho aan looga maarmin qodobbada kala ah: hannaan doorasho (sida Liiska Xiran ee Mataaladda Isku Dheelli-Tiran ama nidaamka Qofkii Hormaraa Guuleystay ama hannaanyada kale ee meesha loo badan yahay ama isku dhafka.

11 Fiiri: qodob 12-aad ee Dastuureedka ee ay golaha wasiiradu ansixiyeen, una soo gudbiyeen baarlamaanka qaranka.

12 Inkasta oo ay diideen saamileyda siyaasaddu, golaha wasiirada ayaa ansixiyay sharcii qabyo-qoraal ah. Fiiri: <https://www.bbc.com/somali/war-48149785>

13 Afhayeenkha baarlamaanka ayaa ku dhawaaqay inuu magacaabay guddi ka kooban 15 xubnood oo dib-u eegis ku samaysa sharcii soo jeedin-tii golaha wasiirada. Wawaana loo xilsaaray inay soojeedin la miyaaddaan. Fiiri: <https://goobjoog.com/english/federal-parliament-appoints-an-interim-committee-to-amend-the-national-election-law/>

14 Eeg: Soojeedintii baarlamaanka ee ku saabsanayd doorashooyinka https://www.hiiraan.com/news4/2019/Nov/166268/somalis_want_a_winner_takes_all_electoral_system_parliamentary_report.aspx

15 Eeg warbixintii ay soo saareen guddidii khaaska ahaa ee baarlamaanku u saaray doorashada 19 November 2019. (Warbixinta Guddiga ee Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal oo u gudbaya akhrinta 2aad; <https://bit.ly/3cvsPOJ>)

16 Qodobka 4(3).

17 Qodobka 4(5) ee sharciga doorashooyinka.

18 Qodobka 12(3) ee sharciga doorashooyinka

Sidoo kale, waxaa muhiim ah in meel la saaro nooca doorashada (ma qof baa la dooranayaa mise xisbi),¹⁹ xajmiga baarlamaanka, tirade ugu yar ee xisbi uu baarlamaanka uga mid noqon karo, iyo midda ugu muhiimsan oo ah: baaxadda degmada iyo kuraasta taalla. Sharcigan Soomaaliya ee la saxiixay, waxa uu taabanayaa dhammaan qodobbadaas shanta ah:

- Kow, wuxuu dhigaya in nidaamka doorashada uu noqonaya midka “Meesha loo badan yahay” kuna qotoma nidaamka FPP.²⁰ Inkasta oo sharcigu isku milayo laba nooc doorasho, haddana hadafku wuu cad yahay, oo waxa weeye in la qaato nidaamka Qofkii Hormaraa Guuleystay ama FPP.²¹
- Labo, nooca doorashada ayuu sharcigu ku sheegayaa in ay noqonayso mid ku qotonta shakhsiga (musharraxa) iyada oo la filayo in xisbiyadu ay kaalin qaataan. Tusaale ahaan, sharcigu waxa uu qabaa in xisbi kasta uu u tartamo ugu yaraan boqolkiiba konton kuraasta labada aqal, iyada oo la ogsoon yahay in aan weli la dhammays-tirin sharciga xisbiyada²²
- Saddex, sharcigu waxa uu xisbiyada ku khasbayaa in ay soo helaan ugu yaraan boqolkiiba afar (4%) kuraasta labada aqal oo u dhiganta 13 xubnood labada aqal.²³ Xisbigii tiradaas la imaan waaya, uma jiro karo xisbi ahaan, xubnihiisana waxaa loo aqoonsanayaa kuwa madax bannaan, ama waxa ay ku biiri karaan xisbiyo kale.
- Afar, tirada guud ee baarlamaanku isma beddelin, waxa ayna ahaan doontaa 275 Golaha Shacabka iyo 54 Aqalka Sare.
- Ugu dambeyn, dhanka baaxadda degmada, maadaama uu sharcig qaatay nidaamka FPP, mudane kasta waxaa loo doranayaa si madax bannaan oo gooni ah,²⁴ waxaana u tartami kara oo kaliya qabiilka kursigaas hore loogu qoondeeyay.

Dhanka kale, qodobka 12(6) ee sharciga doorashada waxa uu dhigayaa in muwaadiniinta deggan gobol walba oo ka mid ah dowlad gobleed, in ay si toos ah u dooranayaan mudanayaasha aqalka sare (senatarada). Taas macneheedu waxa uu noqon karaa in dowlad gobleed walba ay 3 kursi u qoondeyso gobol walba. Tusale ahaan, Jubbaland oo ka kooban saddex gobol waxa ay min saddex kursi u qoondex kartaa gobolladeeda, kadibna muwaadiniinta ayaa toos u dooran doona mudanayaasha.

Marka laga sootago in la sharchiyeyey in xubanaha baarlamaanku ay toos u doortaan madaxweynaha, mudanayaashu waxaa kale oo ay xaddideen awooddha ugu muhiimsan ee madaxwenaha oo aheyd magacaabidda wasiirka koowaad. Sharciga doorashadu waxa uu madaxweynaha ku khasbaayaa inuu ra'iisul wasaaraha kasoo magacaabo xisbiga ama is-bahaysiga ku guuleysta kuraasta ugu badan ee baarlamaanka. Tallaabadani waxa ay abuuraysaa jewi ku khasabaya xisbiyo badan in ay is-baheysi samaystaan, maaddaama ay adag tahay in uu hal xisbi tirada ugu badan ku guuleysto, marka la eego qeybsanaanta baaxadda weyn ee bulshada ku dhex jirta. Ha yeeshi, hannaankan waxaa kale oo uu horseedayaa xukuumado aan cago xooggan ku taagneyn, maaddaama is-baheysiyyada siyaasaddu ay siyaabo badan isugu dhacaan lana daalaadhaacaan in ay hantaan, haystaanna aqlabiyyad.

Sharcigu waxaa kale oo uu isku taxallujinayaa inuu xal u helo dhibaatooyinka ragaadiyey siyaasadda Soomaaliya, oo ay ugu horreysa lacagta ajnabiga. Sharcigu wuxuu musharrixiinta ka reebayaa inay lacag kasoo qaataan shisheeye, ha yeeshi fulinta qodobkan wuxuu noqon doonaa mid aad u adag²⁵. Intaas waxaa dheer, sharcigu wuxuu farayaa in la isticmaalo nidaamka hubinta codbixiyaha ee **biometric** loo yaqaanno.²⁶

19 Bernard Grofman and Arend Lijphart, *Electoral Laws and Their Political Consequences*, vol. 1 (New York: Algora Publishing, 2003).

20 Qodobka 10(1).

21 Iyadoo la adeegsanayo dib-u-eegisyada la samayndoono, Golaha baarlamaanku waa inuu saxaa khaladaadyada fud-fudud. Sida culuumta siyaasaddu timaamayso FPTP iyo ‘majoritarian systems’ way kala duwanyihiin. FPTP waa marka musharraxu helo codadaka ugu badan. ‘Majoritarian system’ kuna waa marka kuu helo in kabaden 50% si uu korsiga ugu guulaysto. Sida qaalibka ah, hadduu musharruxu qaato in kabaden 50%, labada musharrax ee ugu codka badan ayaa fagaaraha isugu soo hara. Sidaa darteed waa in ereyga ‘majoritarian’ laga saaro meesha.

22 Qodobka 10(2) ee sharciyada doorashooyinka.

23 Qodobka 12(9) ee sharciya doorashooyinka.

24 Qodobka 10(2) ee sharciga doorashooyinka.

25 Eeg qodobka 30(7) ee sharciya doorashooyinka.

26 Eeg qodobka 16(4) ee sharciya doorashooyinka.

Inkasa oo qodobkani yahay tallaabo wanaagsan, haddana marka la eego sida uusan dalka u oollin qalabkii loo baahnaa ee casrig ahaa, fariddiisu macno badan ma lahan. DFS iyo dowlad goboleedyada toona ma lahan waraaqo-aqoonsi lagu tashan karo. Diiwaan galinta malaayiin qofna waxa ay u baahan tahay muddo sannad ka badan, waaba haddii qalabkii oo dhan la hayo. Khubaradu waxa ay qabaan in qalabka diiwaan galinta codbixiyaha uu Aad qaali u yahay, una baahan yahay ugu yaraan 18-24 bilood oo diyaar garow ah, kahor doorashada.²⁷

Dhanka arrinta muhiimka ah ee xallinta khilaafaadka, sharcigu waxa uu soo bandhigaya laba wadiiqo: Maxkamadda Sare waxa ay qaadeysaa dacwadaha xagga maamulka iyo go'aannada Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka, halka Maxkamadda Dastuurka ay qaadayso dacwadaha la xiriira xuquuqda ka qeybgalka codbixiyaha iyo natijada doorashada, wixii ku siman 14 maalmood.²⁸ Hase ahaatee, Maxkamad Dastuuri ah weli lama sameyn.

Ugu dambayntii, sharicgu waxa uu farayaan Guddiga Doorashooyinka Qaranka in uu soo bandhigo qorshe howleedkiisa ku beegan qabashada doorashada (ama inuusan diyar aheyn), ugu yaraan 180 maalmood kahor maalinta doorashada.²⁹ Maalintaas waxay ku beegan tahay 27-ka May 2020. Haddii guddigu uusan awoodin inuu doorashada wakhtigieeda ku qabto, labada aqal ee baarlamaanka ayaa fadhi wadajir ah ku go'aaminaya tallaabada laqaadayo.³⁰

Cilladaha Waaweyn ee uu Leeyahay Xeerka Doorashooyinku

Inuu madaxweynuhu saxiixay Xeerka Doorashooyinka waa horumar la taaban karo oo horseedaya dimoqraadieynta dalka. Gaar ahaan arrintanu waa u muhiim dalka Soomaaliya oo aysan doorasho dadweyne oo qof iyo cod ah ka dhicin muddo 50 sano ah.

Runtii xeerkani wuxuu gundhig u noqonaya in Soomaaliya ay mar kale noqoto dal dimoqraadi ah, sidii ay horeyba mar u noqotay dalkii ugu horreeyey ee Qaaradda Afrika si dimoqraadi ah xukunka iskugu baddalay.³¹ Ha yeeshi, waxaa jira su'aalo badan oo uusan xeerka doorashooyinku ka jawaabin. Taasinna waxa ay kalliftay in labada aqal ee baarlamaanku ay u saaraan guddi ka soo shaqeeya dhamaystirka afar arrimood oo ka dhiman.

Kow, xeerka doorashooyinka ma uusan dhigin kuraasta labada aqal deegaan ama degmooyin. In kuraasta aqalka hoose (275 kursi) ay deegaameysan tahay waa shardi muhiim ah runtii. Taas baddalkeeda, xeerku wuxuu caddeynayaa in beel kasta ay heysanayso kursiga ay hadda haysato oo xubnaha beeshaasi ay ku tartamayaan. Haddii si kale loo dhigo, baarlamaanku wuxuu markii ugu horreysa xalaaleeyey oo xeeriyeey nidaamka awood-qeybsiga ee 4.5 kaasoo markii hore ahaa xalmastuur aan qorneyn. Taasna waxaa ka dhashay in baarlamaanku uu sii murjiyeey xaalad hore u qasneyd oo ku saabsan is-dhexgalka qabiilka iyo siyaasadda. Dhanka kale, baarlamaanku wuu xalliyeey welwel ay qabeen kooxaha iyo beelaha qaar maaddaama uu kursi kasta beel u xiray. Laakiin, taasi waxa ay ka horimaynaysaa dimoqraadiyadda ku dhisan qof iyo cod oo qof walbana uu leeyahay xaq inuu wax doorto, lana doorto.

Labo, xeerka doorashooyinku wuxuu dib u riixay arrimaha muhiimka ah ee la xiriira kuraasta Soomaaliland iyo metalaadda gobolka Baraandir. In ka badan 50 xildhibaan oo ku jira labada aqal ayaa metala Soomaaliland inkasta oo aysan tegi karin degmooyinka ay metalaan. May 18, 1991, Soomaaliland waxay ku dhawaaqday inay ka go'day dalka intiiska kale. Sannadkii 2016, xildhibaannada Somaliland waxaa lagu xulay/doortay Muqdisho, waxaana ka dhashay su'aalo muhiim ah waddada loo maray iyo saameynta ay ku leeyihii Soomaaliland. Sidoo kale, waxaa soo if-baxay saameyntii iyo maamulidda uu ku yeeshay habka xulista matalayaasha Somaliland, maamulkii markaas jiray ee uu madaxweynaha ka ahaa Xassan Sheekh Maxamuud.

²⁷ Eeg qoraalka Wolf, Peter, Abdul Alim, Brown Kasaro, Pontius Namugera, Mohammed Saneem, and Tamir Zorigt. Introducing Biometric Technology in Elections. International Institute for Democracy and Electoral Assistance (International IDEA), 2017. P. 32.

²⁸ Qodobka 50(3) ee sharciyada doorashooyinka.

²⁹ Qodobka 50(3) ee sharciyada doorashooyinka.

³⁰ Qodobka 53(3) ee doorashooyinka

³¹ Eeg: Samatar, Cabdi Ismail. Africa's First Democrats: Somalia's Aden A. Osman and Abdirazak H. Hussen. Indiana University Press, 2016.

Dhanka kale, waxaa jira dood xoog leh oo ka taagan maqaamka Muqdisho iyo gobolka Banaadir maaddaama aanay ahayn maamul-goboleed. Sanadkii 2016-kii Muqdisho ma aysan lahayn guddi heer gobol ah oo maamula doorashada. Marka laga reebo xildhibaannada matalaya Soomaaliland iyo dhowr kale, ma jirin xildhibaanno badan oo lagu doortay Xamar. Haddana, inta badan xildhibaannadu waxa ay ku nool yihiin Muqdisho. Waxaa taas ka sii daran inaysan Muqdisho lahayn hal kursi oo aqalka sare ah wallow uu dastuurku si cad u qeexayo in gobolladii 18-ka ahaa uu mid walba yeelanayo saddex kursi.³² Waxaa jira xoogag farabadan oo u ololeynaya inay Muqdisho noqoto maamul-goboleed wallow dastuurku uu leeyahay maqaamka Muqdisho waa laga tashanayaa – ilaa iyo hadda arrinta Muqdisho ma noqon mid loo soo jeestey.³³

Saddex, Xeerka Doorashooyinku ma caddeynayo sida lagu xaqijinayo metalaadda haweenka. Culeysyo badan oo ka imanayey bulshada caalamka dartood, sanadkii 2016, haweenku waxa ay heleen 24% kuraasta (329) labada aqal. Haddaba marka la fiiriyo dhaqanka Soomaalida oo aan haweenka siineyn awood siyaasi ah, sida kaliya ee lagu xaqijin karo metalaadda haweenka waa in la sharciyeyo qoondahooda lana fuliyo sharcigaas.

Afar, xeerka doorashooyinku wuxuu leeyahay waa in door muuqda la siiyaa xisbiyada doorashooyinka soo socda. Ha yeeshie, baarlamaanku weli ma uusan ansixin wax-ka-baddalka xeerka xisbiyada oo xeerinaya doorka xisbiyadu ku yeelanayaan doorashada. Guddiga Doorashooyinku waxa ay si ku-meelgaar ah u diiwaan geliyeen 82 xisbi.³⁴ Inkasta oo kororka xisbiyadu ay wanaagsan tahay, haddana haddii aanan xeerka xisbiyada la helin jiritaankoodu waa macna-beelayaa. Malaha waaba sababta dib loogu dhigay ‘xisbigii weynaa’ ee Madaxweyne Farmaajo iyo Ra'iisul-Wasaare Kheyre ay sheegeen inay ku dhawaqaqayaan. Haddii la soo koobo, doorasho xor iyo xalaal ah ma dhici karto xeerkaas la'aantiis.

Caqabahada Hortaagan Hirgelinta Xeerka Doorashada

Waxaa jira toddoba caqabadood oo horyaal hirgelinta xeerka doorashada ee sanadkan la filayo:

Caqabada Koowaad: Inkasta oo labada aqal ay tiro badan ku ansixiyeen xeerka doorashada, haddana waxaa jira qeybo muhiim ah oo aan taageerin. Labada maamul-goboleed ee Puntland iyo Jubbaland waa ay kahoryimaaddeen xeerkan. Labada maamul waxa ay ku dhawaaqeen in ay xireen xafiisyada Guddiga Doorashada.³⁵ Sidoo kale, waxa ay doonayaan maamulladani in guddiga doorashada ee heer gobol uu kaalin ku yeesho maamulka doorashooyinka. Xisbiyada mucaaradka ah ayaa iyaguna ka horyimid hannaanka ay dowladdu u abbaartay nidaamka doorashada.

Caqabada Labaad: Waqtiga ka haray muddo-xileedka baarlamaanka (6 bilood) iyo Madaxweynaha (8 bilood) kuma filna in la dhameystiro xeerka, dabadeedna la diyaariyo doorashooyin qof iyo cod ah. Sida muuqata hirgelinta sharcigan wuxuu qaadanayaa sannado, wuxuuna u baahan yahay diyaar-garow weyn.

Caqabada Saddexaad: Xaaladda guud ee nabadjelyada dalku waa ay liidataa. Qeybo badan oo ka mid ah dalkana waxaa maamula ama saameyn xoog leh ku leh kooxda xagjirka ah ee Al-Shabaab. Haddaba in la sugo nabadjelyada doorasho ka dhaceysa dalka oo dhan waxay u baahan tahay tobonnaan kun oo ciidan ah. Inkasta oo ay dowladdu sameysay guddiga amniga doorashooyinka, si ay u soo qiimeeyaan xaaladda, haddana xaaladda siyaasadeed iyo khilaafka maamul-goboleedyada Puntland iyo Jubbaland wuxuu keenayaa inaysan soo qiimeyn karin gobolladaas haddii aan la helin heshiis siyaasadeed.

Caqabada Afaraad: Si loo fuliyo doorasho qof iyo cod ah waxaa loo baahan yahay dhaqaalo badan oo kor u dhaafaya \$100 milyan oo dollar. Runtiina dhaqaalahaas dowladda dhexe iyo kuwa gobolladu ma awoodaan hadda. Inkasta oo ay cid walba ogeyd in doorasho ay dhacayso 2020, haddana dowladdu miisaaniyaddeeda wax dhaqaale ah uguma darin doorashooyinka.

³² Eeg: Qodobka 72naad ee dastuurka ku meelgaadhka ah, ee dawladda fedaraalka Soomaaliya.

³³ Qodobka 12(6) ee shariyada dastuurku wuxuu si cad u qeexayaan inuu baarlamaanka xal kama dabysa kagaadhidhoono matalaadda gobolka Banaadir.

³⁴ Eeg: <https://niec.so/en/parties/registered-political-parties>

³⁵ Eeg: warmurtiyaad ka soo baxay sharkii wadatashiga Puntland bishii Maarsio 2020.

Waxaa kaliya oo ay kafaala-qaadday dhaqaalaha guddiga doorashooyinka ay ku shaqeeyaan ee sannadlaha ah. Guddiga Doorashadu wuxuu u baahan yahay \$53 milyan oo dollar. Illaa hadda, waxaa jira yabooh ay sameeyeen deeq-bixiyayaalka caalamka, laakiin sida muuqata kuma filna.

Caqabada Shanaad: Farsamo ahaan arrimaha loo baahan yahay si doorasho qof iyo cod ah ay u dhacdo weli waa qabyo ama maba jiraan xilligan. Si doorasho xor iyo xalaal ah oo aan musuq-maasuq lahayn ay u dhacdo, Guddiga Doorashadu waxa ay u baahan yihiin farsamada teknoolijiyada casriga ah ee loo yaqaan “biometric system” si ay u diiwaan geliyaan dadka codeynaya. Tusaale ahaan, Soomaaliland waxa ay ka shaqeyneysay diyaarinta arrimahan muddo 20 sano ku dhow. Welina waxaa jira eedo badan oo la xiriira wax-is-daba-marsiin. Caqabadaha waxaa ka mid ah inaan dadka Soomaaliyeed intooda badan lahayn warqado aqoonsi oo heer qaran ama heer gobol ah. Taasina way sii adkeyneysaa hawsha diiwaan gelinta.

Caqabada Lixaad: Xeerka Doorashadu wuxuu caddeynayaa in Guddiga Doorashada ee Heer Federaal uu maamulayo doorashada dalka marka laga reebo Soomaaliland iyo meelaha ay Al-Shabaab heystaan. Sida ay muujinayaan Puntland iyo Jubbaland, arrinkaasi ma aqbalayaan oo waxay hore u xireen xafisiyada guddiga doorashooyinka. Arrintaas waxay lamahuraan ka dhigeysa inay dowladda dhexe iyo maamul-goboleedyadu ay ka heshiyaan.

Caqabada Toddobaad: Sida muuqata, cudurka COVID-19 wuxuu saameyn weyn ku yeelan karaa dadka Soomaaliyeed oo awalba tabar-yaraa. Inkasta oo guud ahaan tirada la xaqiijihey inuu ku dhacay cudurku ay yar tahay, haddana waxaa jira cabsi ah inuu cudurku aad u faafay maadaama aysan dadku aad ugu baraaarugin ama awoodin hababka lagu xakamaynayo cudurka sida kala-fogaanshaha ama joogista guryaha. Haddii uu cudurkani aad u fido, waxaa dhici karta inuu dhaawac weyn geysto, ayna lama huraan noqoto in dib loogu noqdo waqtiga doorashada. Haddana, marka la eego qaarradda Africa, waxaa muuqanaya in doorashooyin badan oo 2020 qorsheysnaa badankood aan illaa hadda dib loo dhigin. Dalka Itoobiya oo kaliya aaya lix bilood doorashadii dib u dhigay, waxa ayna taasi keentay jahwareer siyaasadeed.

Waxaa kale oo la hadal hayaa Uganda inay did u eegto doorashada madaxtinnimada oo qorsheysan sanadka soo socda ee 2021.

Habka Ka-Qeybgalka Ballaaran (Expanded Participation Model)

Iyadoo laga shidaal-qaadanayo qeybaha muhiimka ah ee Xeerka Doorashooyinka, Machadka Heritage waxa uu soo jeedineynaa hannaan kale oo lagu maareyn karo doorashada soo socota ee 2020, waxaana ugu-magac-darnay “**Habka Ka-Qeybgalka Ballaaran**”. Wuxuuna u shaqeynayaa sidan:


- Maaddaama uu xeerka doorashadu u xirayo kursi kasta beesha heysata inay ku tartanto, beel kasta oo uu kursi ka dhhexeyo waxay soo magacaabeysaa 1000 qof oo codeeya.
- Kunkaas qof uma codeynayaan kursiga beeshooda oo kaliya. Waxaa lagu darayaa ergada kale ee maamul-goboleed-kooda ka imanaysa.
- Tusaale, Maamul-Goboleedka Koonfur-Galbeed waxaa taal 69 kursi. Habka aan soo jedinnay, waxay noqoneysaa ergada Koonful-Galbeed 69,000 oo qof oo ka yimid dhammaan beelaha uu maamul-goboleedkaasi ka kooban yahay. Tiradaas ah 69,000 ayaa u codeynaysa dhammaan xildhibaannada gobolka. Marka loo barbar-dhigo sanadkii 2016, 51 ergo ah ayaa dooratay xildhibaan kasta.
- Sidoo kale, Puntland waxaa codeynaya 40,000 qof maaddaama ay taal 40 kursi.
- Galmudug waxaa codeynaya 36,000 qof maadaama ay taal 36 kursi.
- Hirshabille waxaa codeynaya 37,000 oo qof halka ay Jubaland codeynayaan 39,000.
- Habkani wuxuu soo jedinayaa in kursi kasta oo aqalka hoose ah ay u codeeyaaan ugu yaraan 35,000.

Habkani wuxuu kordhinayaa tirada u codeynaysa kuraasta aqalka hoose oo aheyd sanadkii 2016 14,025, wuxuuna gaarsiinayaa tirade 221,000 oo qof. Kunka qof ee ergada ama wax-doortayaasha ah waxa ay ka koobnaaneysaa qaybaha kala duwan ee bulshada sida odoyaasha dhaqanka, haweenka, dhallinyarada, bulshada rayadka, ganacsatada iyo muwaadiniinta kale. Odoyada dhaqanka iyo siyaasiyiinta iyo Guddiyada Doorashooyinka aaya ka heshiinaya hannaanka lagu soo xulayo kunka qof.

Habka Ka-Qeybgalka Ballaaran waxa uu xaqijinayaa in dad badan ay codkooda dhiibtaan, taasina waxa ay keeneysa in musuqu uu ka yaraado sidii hore. Habkani waxaa kale oo uu sahlaya in qoondada dumarka la xaqijiyo iyo metalaadda Soomaaliland ay la mid noqoto kuwa kale ee xildhibaannada ah.³⁶

Doorashadu waxay ka dhacaysaa saddex magaalo oo ka mid maamul-goboleed kasta. Tusaale, Galmudug waxa ay ka dhaceysaa Dhuusamarreeb, Gaalkacyo iyo Caabudwaaq; Puntland waxa ay ka dhaceysaa Gaalkacyo, Garowe iyo Boosaaso. Tani waxa ay keeneysa in la sii hagaajiyo nidaamka doorashada waayo waxaa doorashada ka qeyb-galaya dad badan, waxayna kobcineysaa metalaadda gobollada yareyneysaana mid qabiilka, maaddaama dadka dooranaya xildhibaanka ay u badan yihiin dad aan ku beel ahayn.

Waxaa kale oo aan soo jeedineynaa in xisbiyada siyaasadda kaalin la siiyo xitaa haddii aan la dhameystirin xeerka xisbiyada. Diwaan-gelinta ku-meel-gaarka ah waa ay ku hawl-geli karaan. Xisbiyadu waxa ay soo gudbinayaan liiska dadka ku tartamaya magacooda hadba inta kursi ee ay ka tartamayaan. Sidoo kale, xisbiyadu waxa ay ka qeyb-qaadan karaan soo xulista ergada oo ah 1,000 qof kursi kasta. Maalinta doorashada musharax kasta waxaa lagu daabacayaa warqadda codeynta musharraxa iyo xisbiga uu ka tirsan yahay si ay dadka wax dooranayaan u aqoonsadaan qofka ay u codeynayaan.



Doorashada Aqalka Sare

Sida dastuurku qabo, waxa aan soo jeedineynaa in ergada gobolladu ay soo doortaan xildhibaannada aqalka sare ee dooranaya aqalka hoose. Sanadkii 2016, madaxweynayaalka maamul-goboleedyada ayaa laba ama saddex qof soo xulayey, markaas baa baarlamaannada gobolladu u codeeyeen. Doorashada soo socota waxaa kale oo aan ku talinaynaa in qof kasta oo ka mid ah beesha kursiga la siiyey oo xisbi ka tirsan oo soo buuxiya shuruudaha uu u tartami karo aqalka sare.

Gunaanad

Shaki kuma jiro baahida ay dadka Soomaaliyeed u qabaan doorasho xor ah oo qof iyo cod ah. Ha yeeshiee, waxaa waqtii badan oo saddex sano kor u dhaafay lumiyey hoggaanka siyaasadda. Haddaba, dowladda dhewe ayaa ku guul-darraysatay inay keento xal heshiis lagu yahay, mana ahan inay cudur-daar ka dhigatto fashilkeeda oo dib u dhigto waqtiga dooraashada. Tan kale, waa lama horaan in dadka Soomaaliyeed ay u fahmaan inaysan doorashadu aheyn dhacdo hal mar dhacda ee ay tahay hannaan heerar kala duwan leh oo u baahan wadatashi iyo diyaar-garow dheer.

Hadafka weyni waa inuu ahaadaa in ay dhammaan saamileyda siyaasaddu ka qeyb-qaataan in la gaaro doorasho qof iyo cod ah. Laakiin, hadda waa in lagu dadaalo in la helo heshiis siyaasadeed oo oo dhexmara dowladda dhewe, dowlad-goboleedyada iyo xisbiyada siyaasadda si looga heshiyo hannaan doorasho oo hufan, loo-qaateen ah oo lagu maamulo doorashada 2020. Daraasadani waxa ay soo jeedisay hannaan doorasho hufan suurtagal ka dhigi kara waxaanna ugu magac darnay: **Habka Ka-Qeybgalka Ballaaran (Expanded Participation Model)**.

Talo-soo-jeedin

1. Dowladda dhewe, dowlad-goboleedyada iyo xisbiyada siyaasaddu waa in ay wada-hadlaan si ay u gaaraan hab lagu qaban karo doorashada soo socota ee 2020. Jewiga siyaasadeed iyo kala-fogaanshaha siyaasiyiintu waxa uu halis weyn gelin karaa horumarkii la sameeyey labaatankii sano ee la soo dhaafay ee la xiriiray nabaddhis iyo dowlad-dhiska dalka.

³⁶ Xisbiyada oo kaashanaya guddiga doorashooyinka qaran waa in ay doodaan dawlad gobaleedka ay xubnaha baarlamaanka ka soo jeeda Soomaaliland ka tartami doonaan.

2. Dowlada dhexe waa in ay hoggaanka qaadato oo shir iskugu keento saamileyda siyaasadda si looga gudbo caqabadaha ragaadiyey siyaasadda, loona gaaro xal la wada leeyayah.
3. Saamileyda siyaasaddu waa inay isla-qaataan in aan mar danbe lagu noqon doorasho dadban. Waana inay aqbalaan xaqa ay dadka Soomaaliyeed u leeyihin inay doortaan wakiillada metelaya 2025.
4. Dowladda dhexe, dowlad-goboleedyada iyo xisbiyada siyaasaddu waa inay ka wada hadlaan habka farsamo ahaan lagu xaqiijinayo qoondada dumarka, metelaadda gobolka Banaadir iyo habka iyo goobta lagu dooranayo xildhibaannada Soomaaliland.
5. Dhammaan doorashooyinkii hore ee dalka soo maray, deeq-bixiyayaasha ama bulshada caalamka ayaa culaysinayey siyaasiyiinta Soomaalida si ay u suuragasho doorasho xiligeeda qabsoonta. Bulshada caalamka oo uu hormuud u yahay xafiiska Qararmada Midooabay waa inay ka qeyb-qaataan hirgelinta wadahadalka saamileyda siyaasadda. Weliba, Golaha Ammaanku waa inuu ku soo rogaa cunna-qabateyn ciddii diidda inay wada-hadalka ka qeyb-gasho si doorashada 2020-ka ay u dhacdo waqtigeeda.



Readers are encouraged to reproduce material for their own publications, as long as they are not being sold commercially. As copyright holder, the Heritage Institute for Policy Studies requests due acknowledgement and a copy of the publication. For online use, we ask readers to link to the original resource on the HIPS website.

© Heritage Institute for Policy Studies 2014. This work is licensed under a Creative Commons Attribution-NonCommercial Licence (CC BY-NC 3.0)